GUNDERSEN HEALTH SYSTEM®

Policy

| | |
|---|---|
| **Mowduuca** | Kaalmada Maaliyadda |
| **Nambarka Aqoonsiga** | GL-2555 |
| **Qeybta** | Wareegga Dakhliga |
| **Qeybta hoose** | Maamulka Wareegga Dakhliga |
| **Nooca** | Shirkad |
| **Xariirka** | Doris Schumacher |
| **Taariikhda Hirgelinta** | 04/01/2023 |
| **Taariikhda Baddalaadda Xigta** | 03/31/2024 |

## TIXRAACYADA

EMTALA: Aruurinta Macluumaadka Maaliyadda
Siyaasadda Biilasha Qofka Iska Bixiyo iyo Aruurinta (Self-Pay Billing & Collection Policy)
Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Guidelines), Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Mareykanka (US Department of Health and Human Services)
Ogeysiiska IRS 2015-46 iyo 29 CFR §§1.501(r) (4) – (6)
26 CFR 250 (31 Dec 2014) p78954-79016
Soo sheegidda Deynta Xun ee Medicare
Bogga dambe 1: Foomka Arjiga Kaalmada Maaliyadda
Bogga dambe 2: Jaantuska dhimista wuxuu ku saleysan yahay heerarka dakhliga iyo hantida, iyo dhimista aan ceymiska ku jirin
Bogga dambe 3: Bixiyeyaasha iyo waaxyada ku jira ceymiska
Bogga dambe 4: Xisaabaadka Gudd Ahaan la soo Dallaco (Amounts Generally Billed) (AGB)
Bogga dambe 5: Helitaanka warqadaha ee dadweynaha

## LAGU DABAQI KARO

Dhamaan bukaanka Siistemka Caafimaadka Gundersen St. Elizabeth's Hospital and Clinics (hereinafter, collectively referred to as GSEHC) ee qaata adeegyada daryeelka caafimaadka ee laga qaato Xarunta Caafimaadka Gundersen St. Elizabeth's Hospital and Clinics, including Hospital, Wabasha Clinic, Alma Clinic, Senior Living, Home Care, Care Center-Grant Boulevard and Care Center-Shields Avenue.

## UJEEDADA BAYAANKA

Anagoo kaashaneyno siyaasaddena Biilka iyo Aruurinta (Billing and Collection) iyo Himilada iyo Aragtida GSEHC, waxaan soo safnay habka lagu hubiyo in bulshada heli karto kaalmada maaliyadda iyadoo waafaqsan tilmaamaha gobolka, federaalka, iyo qaanuunka.

## SIFEYNTA

Sifeynta soo socoto waxaa lagu dabaqi karaa dhamaan qeybgaha siyaasaddaan.

**Xisaabta Guud Ahaan la soo Dallaco (AGB):** Guud ahaan, xisaabta la soo dallaco waa lacagta la fillaayo in lagu bixiyo degdegga ama adeegyada caafimaadka loo baahan yahay, iyo/ama ballan qaadaha bukaanka. Bukaanka xaqa u yeesha, xisaabtaan kama badnaan karto qadarka la xisaabin doono marka la isticmaalo Habka Fiirinta Gadaal (Look Back Method) ee lagu sharaxay §1.501(r)-5(b) (3) ee Koodka Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Code). Habka Gadaak u Fiirinta (Look Back Method) wuxuu ku saleysnaan doonaa sheegaashooyin dhab ah, la soo dhaafay, ayna bixisay Medicare Fee-for-Service iyo dhamaan ceymiyeyaasha caafimaadka gaarka ah ee bixiya sheegashooyinka. AGB waxaa sannadkii la xisaabi

maalinta 45aad ee ka dambeyso gabogabada sannadka kalendarka ee la soo dhaafay, waxaana la fullin doonaa maalinta 120aad ee ka dambeyso gabogabada sannadka kalendarka.

**Xisaabta Guud Ahaan la soo Dallaco Boqolkiiba:** Sannad kasta waxaa la xisaabi doonaa boqolkiiba AGB maalinta 45aad sannadka, waxaana lagu sharaxay Bogga Dambe 4 ee siyaasaddaan.

**Muddada Arjiga:** Muddada la qabano karo arjiyada, lagana shaqeyn karo, si loo helo kaalmada maaliyadda. Muddada arjiga waxay bilaabataa taariikhda bayaanka kowaad ee ka dambeeya adeegga kaddib, waxay dhamataa maalinta 240aad kaddib taariikhda bayaanka biilka ka dambeeyo adeegga la bixiyo.

**Kaalmada Daryeelka Musiibada (Catastrophic Care Assistance):** Kaalmada maaliyadda la siiyo bukaanka xaqa u yeesha marka dakhliga soo gala qoyska sannadkii ka badan yahay 400% Heerka Saboolnimada Federaalka (Federal Poverty Level), iyo hanti ka yar xisaabta 600% Heerka Saboolnimada Federalka (Federal Poverty Level) iyo waajibka maaliyadda ka dhasha adeegyada daweynta ay bixiso GSEHC oo ka badan 25% dakhliga guud ee sannad kasta soo galay qoyska.

**Daryeelka la Dhimay:** Kaalmada maaliyadda ee laga helo dhimista - loogu talogalay adeegyada caafimaadka la ogol yahay ay GSEHC bixiso, sida ku saleysan miisaanka - loogu talogalay bukaanka xaqa u yeesha, ama damaanad qaadeyaasha, sannadkiiba dakhliga guud ee soo gala qoyska u dhexeeyo 200-400% Heerka Sabolnimada Federaalka (Federal Poverty Level) iyo hanti ku beegan lex jeer Heerka Saboolnimada Federaalka.  Meelaha adeegga ee ka qeybqaata in NHSC waxay isticmaali doonaan dakhliga soo gala qoyska sannadkii in uu yahay 201-400% Heerka Saboolnimada Saboolks.

**Xaaladda Caafimaadka Degdegga:** Sida ku sifeysan Qeybta 1867 ee Sharciga Soshal Sekuritiga (Social Security Act) (42 U.S.C. 1395dd). Ereyga
"xaaladda degdegga caafimaadka" waxaa loola jeedaa xaaladda caafimaadka ee muujisa calaamadaha in ku filan darran (kana mid ah xanuun darran) ilaa heer la'aanta daryeel caafimaad degdeg ah la fillan karo in uu dhalliyo naafonimo culus oo la xariira xubnaha ama hawlaha jirka, halis culus oo ku timaadoi nafta, taasoo caafimaadka xaamilada ama cunugga aan weli dhallanin gelin karta carqalad culus.

**Qoyska:** Sida ay u sifeysay Xafiiska Tiro Koobka Mareykanka (US Census Bureau), koox ka kooban labo qof ama ka badan oo meel wada daggan kana dhexeeyo xariir ku dhisan dhallasho, guur, ama korsasho. Haddii bukaanka sheegto in qof u yahay ku-tiirsane xagga canshuur celintooda, sida waafaqsan sharciyada Adeegga Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Service), waxaa loo aqoonsan karaa in ay yahiin ku-tiirsane xagga xaq u yeelashada siyaasaddaan.

**Dakhliga Qoyska:** Dakhliga qoyska arjiilaha waa iskudarka dakhliga guud ee dhamaan xubnaha qaangaaray ee qoyska la nool reerka kuna jira canshuur celinta federaalka ugu dambeyay.

**Heerka Saboolnimada federaalka:** Heerka Saboolnimada Federaalka Federal Polverty Level (FPL) waxay adeegsataa heerarka dakhliga ee ku kala duwan tirada iyo inta uu ka kooban yahay qoyska si loo ogaado cidda ku sugan saboolnimada waddanka Mareykanka (https://aspe.hhs.gov/topics/poverty-economic-mobility/povertyguidelines).

**Kaalmada Maaliyadda:** Kaalmo la siiyo bukaankaxaqa u yeesha, oo haddii aan la siinin la kulma dhibaato maaliyad, si looga qaadodhamaan ama qeyb ka mid ah waajibka maaliyadda dedegga ama caafimaad ahaan daryeelka ay u baahan tahay GSEHC.

**Damaanad Qaadaha:** Qofka, marka laga reebo bukaanka mas'uulka ka ah bixinta biilka bukaanka.

**Iskudarka Eedeynta** Iskudarka kharashka la soo dallaco xisaabta loo dajiyay bixinta adeegyada daryeelka bukaanka ka hor inta aan laga goynin dakhliga.

**Guri laawaha:** Sida ay u sifeysay dawladda Federaalka, kaddibna HUD ku soo daabacday Diiwaanka Federaalka (Federaal Register) bishii Diseembar 5, 2011: Qofka ama qoyska lahayn meel uu daggo oo joogto ah, caadi ah, oo habeenkii ku filan, macnaha qofka ama qoyska wuxuu leeyahay guri aasaasi ah uu habeenkii jiifto, taasoo ah meel dadweyne ama

meel gaar ah aan loogu talogelin in uu daggao aadanaha ama ku nool yahay hooy dadweyne ama gaar loo leeyahay oo loo sameyay in laga helo ku noolaasho ku meelgaar ah.

**aawada:** Sida ay ku sifeysay Medicare sida adeegyo ama waxyaabo macquul ay oo lagama maarmaan u ah baarista ama daweynta xanuunka ama dhaawaca.

**Qorshaha Lacag Bixinta:** Qorshaha lacag bixinta ay ku heshiyaan GSEHC iyo bukaanka, ama damaanad qaadaha bukaanka, xagga khidmadaha uu qofka ka bixiyo jeebkiisa (out-of-pocket-fees). Qorshaha lacag bixinta wuxuu tixgelin doonaa daruufaha maaliyadda bukaanka, xisaabta lagu leeyahay, iyo lacag bixin hore haddii ay jirto.

**Xaq u yeelashada Tooska (Presumptive Eligibility):** Sida waafaqsan daruufha qaar, bukaanka aan ceymiska ku jirin waxaa loo qaadan doonaa ama in uu xaq u leeyahay kaalmada maaliyadda sida ku saleysan ku qornaashadooda brograamyada tijaabinta-habka (means tested) ama ilo kale oo laga helo macluumaad, uusan toos u bixinin bukaanka, si loo sameeyo qiimeyn ku kooban qofka qaba baahida maaliyadda. Haddii bukaanka uu bixiyo lacagta, xaq uma yeelan doono in toos loogu ogolaado.

**Muddada Aqoonsiga:** Arjiileyaasha loo garto in ay xaq u leeyahiin kaalmada maaliyadda waxaa la siin doonaa kaalmo muddo lex bil. Kaalmada waxaa kaloo lagu dabaqi doonaa dhamaan xisabaadka la ogol yahay ee lagu bixiyay adeegyada la qaatay lex bil ka hor taariikhda la soo dalbaday.

**Dhimista aan Ceymis ku Jirin:** Bukaanka aan qabin ceymis dhinac saddaxaad waxaa la siin doonaa dhimis aan ku jirin ceymiska, xagga adeegyada la ogol yahay ay GSEHC bixiso sida hoos timaado siyaasaddaan, waqtiga marka la siiyo dallacaadda aan la dhimin.  Adeegyada qaar waa ka reeban yahiin, iyo dhimista lagu dabaqi karo waxaa toos ahaan loogu dabaqaa bayaanka biilka bukaanka. Dhimistaan waxaa laga saaraa meesha haddii kaddib la aqoonsado laguna darri karin dhimis kale marka laga reebo Dhimista Dhakhso Bixinta Kharashka (Prompt Pay Discount).

**Bukaanka aan Ceymis ku Jirin:** Bukaanka aan haysanin ceymiska dhinac saddaxaad lagana qaato ceymiye ganacsade dhinac saddaxaad, qorshaha ERISA, Brograamka Daryeelka Caafimaadka Federaalka (Federal Health Care Program) (kana mid ah iyadoo aan la xaddidin Medicare, Medicaid, SCHIP, iyo CHAMPUS), Magta Shaqaalaha (Worker's Compensation, ama kaalmo kale oo laga qaato dhinac saddaxaad lana heli karo si loo bixiyo kharashka ku baxa daryeelka caafimaadka bukaanka.

**Bukaanka Qaba Ceymiska Liito:** Qofka qaba ceymis u gaar ah ama ceymis dadweyne, kaasoo uu kala kulmo dhibaato maaliyad in uu si buuxa u bixiyo kharashka laga filaayo uu qofka ka bixiyo jeebkiisa xagga adeegyada caafimaadka Fullinta

## ADEEGYADA LA OGOL YAHAY

Adeegyada xaqa u yeesha dhimista qofka aan ku jirin ceymis iyo hoos yimaada siyaasadda kaalmada maaliyadda GSEHC waa in ay ahadaan kuwo kliiniko ahaan ku habboon kuna jira heerarka dhaqanka caafimaadka la ogol yahay. Waxaa ka mid ah kuwa soo socda:

1. Adeegyada daweynta degdegga ee laga helo xaaladda degdegga.
2. Adeegyada aan la dooranin loogana jawaabo daruufaha halista ku ah nafta marka lagu sugan yahay xaalad degdeg ah.
3. Adeeyada daawo ahaan lagama maarmaanka ah, caadi ahaan sifeyso Medicare ama ceymis caafimaad kale in ay yahiin "waxyaabo ama adeegyo ku jira ceymiska."
4. Brograamka daweynta ku tiirsanaanta kiimikada dagganaha ee Unity House looguna talogalay qaangaarka.
5. Adeegyada bixiyeyaasha u shaqeeyo GSEHC waxay hoos yimadaan ceymiskaan.  Fadlan fiiri Bogga Dambe 3 si aad u heshid liiska bixiyeyaasha ku jira.

Adeegyada aan loo ogoleyn kaalmada maaliyadda waxaa ka mid ah kuwa soo socda:

1. Hababka xullashada ee caafimaad ahaan aan laga maarmin, iyo sidoo kale adeegyada caadi ahaan aysan ceyminin Medicare ama aysan sifeynin Medicare ama aysan ceymis kale ku sheegin in caafimaad ahaan aysan ahayn lagama maarmaan.
2. Qaliinka Lasik (Lasik Surgery), Contacts/Glasses, Muraayadaha Aan Caadiga Ahayn (Non-Standard Lenses), Daryeelka Duugduugidda (Chiropractic Care), Adeegyada Riminta (Fertility Services), Qaliinka Qurxinta (Cosmetic Surgery)/Adeegyada Blaastiigga (Plastic Services), Qalabka Maqalka (Hearing Aides), Toosinta Ilkaha (Orthodontics), iyo Adeegyada Ilkaha (Dental Services)
3. Adeegyada laga helo bixiyeyaasha daryeelka aan u shaqeynin GSEHC (tusaale, kuwa gaarka iyo/ama kuwa caafimaadka balse aan u shaqeynin GSEHC ama aqoonyaanada takhatiirta, gaadiidka ambulansada, iwm.) Fiiri Bogagga Dambe 3 iyo 6 si aad u heshid liis buuxa oo ku saabsan bixiyeyaasha aan ku qorneen siyaasaddaan.
4. Lacagaha horay la gooyo bukaanka iyo lacagaha ceymiska ee la xariira adeegyada lagama maarmaanka u ah caafimaadka ee bukaanka laga siiyo dibadda shabakada sida ay u sifeyaan kuwa ceymiska geliyay.
5. Imtixanaadka ay soo codsadaan dhinaca-saddaxaad (tusaale,

## ISKUDUWIDDA LALA SAMEEYO QIIMEYNTA BAAHIDA CAAFIMAADKA BULSHADA (COORDINATION WITH COMMUNITY HEALTH NEEDS ASSESSMENT)

Xaafadda ay u adeegto GSEHC waxaa loo fulliyay qiimeynta baahida caafimaadka bulshada. Cayilka, caafimaadka madaxa, iyo sida xun loo isticmaalo maaddada waxaa lagu tilmaamay in ay yahiin arrimo caafimaad la taaban karo. Qorshaha fullinta caafimaadka bulshada waxay daweynta isticmaalka maadada u aqoonsatay in uu yahay mid ka mid ah faragelinta caafimaadka madaxa. Idil ahaan baaxadda ku daweynta guriga lana xariirta isticmaalka mukhadaraadka waxaa sidaas darteed loo ogolaan doonaa kaalmada maaliyadda, waxayna hoos imaan doontaa xaddidaadda AGB ee loogu talogalay bukaanka xaqa u yeesha kaalmada maaliyadda ama damaanad qaadeyaasha ku sugan GSEHC.

## HABKA LA OGOL YAHAY

Kaalmada maaliyadda waxaa la gaarsiin doonaa bukaanka aan qabin ceymiska iyo kuwa haysta ceymis liita, ama damaanad qaadaha bukaanka, ee la kulma habka la soo sheegay, sida ku sifeysan hoos. Hababkaan waxay hubin doonaan in siyaasaddaan kaalmada maaliyadda si joogto ah loogu dabaqo GSEHC taasoo reebata xaqa ay u leedahay in ay dib baddasho, wax ka baddasho ama baddasho siyaasaddaan hadba sida loogu baahdo ama sida ku habboon.

Ilaha lacag bixinta (ceymiska laga heli karo shaqada, Kaalmada Daweynta (Medical Assistance), Maaliyadda Saboolnimada (Indigent Funds), Dhibaneyaasha  Dambiyada Dagaal, iwm.) waa in la fiiriyo lana qiimeeyo ka hor inta aan xisaab loo tixgelinin kaalmada maaliyadda si loo hubsado in si taxadir leh loo maamulo ilaha GSEHC xagga bixinta kaalmada maaliyadda. Haddii bukaanka uu u muuqdo in uu xaq u leeyahay kaalmo kale, GSEHC waxay bukaanka u diri doontaa wakaaladda ku habboon si loogu helo kaalmo xagga dhamaystirka arjiyada iyo foomamka loo baahan yahay. Kuwa soo dalbada kaalmo waxaa laga rabaa in ay soo dhamaystaan dhamaan fursadaha kale ee la xariira lacag bixinta taasoo ah shardi lagu xeray ogolaashada kaalmada maaliyadda.

Habka loo baahan yahay in GSEHC ka fakarto marka ay qiimeyaan xaq u yeelashada bukaanka si ay u helaan kaalmada maaliyadda waxaa ka mid ah dakhliga qoyska, hantida, iyo waajibaadka caafimaadka. Brograamka kaalmada maaliyadda GSEHC waxaa heli kara dhamaan bukaanka la kulma sharuudaha xaq u yeelashada ku qoran siyaasaddaan, iyadoo aan la fiirinin joqraafiyada ama xaaladda dagganaashada. Kaalmada maaliyadda waxaa la gaarsiin doonaa bukaanka, ama damaanad qaadaha bukaanka, taasoo ku saleysan baahida loo qabo maaliyadda una hoggaansama sharciyada federaalka iyo kuwa gobolka.

Caadi ahaan, ma aha wax lagu bixin karo kharashka bukaanka ku daro daweynta ama baaqiga ka soo hara ceymiska haddii bukaanka uu ku guuldareysto in uu u si macquul ah ugu hoggaansamo sharuudaha ceymiska sida helitaanka tixraac ku habboon ama ogolaasho. Bukaanka ka fa'iideysta canshuurta, kuwa qaba xisabaadka caafimaadka qofka sida Xisaabta Keydka Caafimaadka (Health Savings Account), Qorshaha Lacag Celinta Caafimaadka (Health Reimbursement Arrangement), ama Xisaabta Kharashka Dabacsan (Flexible Spending Account), waxaa laga filaa in ay isticmaalaan maaliyadda xisaabta ka hor inta aan la siinin kaalmada maaliyadda.
GSEHC waxay reebatay xaqa ay u leedahay in ay dib u celiso dhimista ku sharaxan halkaan haddii ay si macquul ah u ogaato in qodobada noocaas jebiyaan waajibaadka sharciga ama heshiiska lala galay GSEHC.

## XAQ U YEELASHADA TOOSKA (PRESUMPTIVE ELIGIBILITY)

GSEHC waxay fahamsan tahay in dhamaan bukaanka aysan dhamaystiri karin arjiga kaalmada maaliyadda ama aysan u hoggaansami karin codsiyada warqadaha. Waxaa dhici karto in lala kulmo marar la ogaado xaqa bukaanka u leeyahay kaalmada maaliyadda iyadoo aan la dhamaystirin arjiga kaalmadca maaliyadda ee rasmiga ah. GSEHC waxay isticmaali kartaa macluumaad kale si ay u ogaato haddii xisaabta bukaanka aan la soo aruurin karin, kaddibna macluumaadkaan waxaa loo isticmaali doonaa in lagu ogaado xaq u yeelashada.

Waxaa dhici karto in xaq u yeelasho toos ah la siiyo bukaanka taasoo ku saleysan xaq u yeelashadooda brograayo kale ama daruufaha nolosha sida:

1. Bukaanka iyo damanad qaadeyaasha ee ku dhawaaqay in ay kaceen. Kiisaska ku lugta leh khasaaro, baaqiga xisaabta keliya laga bilaabo taariikhda la fasaxo khasaarada ayaa laga dhaafi doonaa.
2. Bukaanka ama damaanad qaadeyaasha dhintay iyagoo aan lahayn hanti maguuraan oo dhaxal ah.
3. Bukaanka ama damaanad qaadeyaasha loo garto in ay yahiin guri laaweyaal.
4. Xisabaadka ay soo celiso wakaaladda aruurinta sida in ay yahiin wax aan la soo aruurin karin, asbaabta kor ku qoran awgood.
5. Bukaanka ama damaanad qaadeyaasha ee xaqa u yeesha brograamyada Medicaid ee Gobolka ama brograamyada kaalmada raashinka ay dawladda maalgeliso, waxay xaq u yeelan doonaan waajibaadka qeybsiga kharashka la xariira brograamkaama adeegyada aan ku jirin ceymis.

GSEHC waxay fahamsan tahay in bukaanka qaar aysan jawaab ka bixin karin arjiga GSEHC. Sida waafaqsan daruufahaan, GSEHC waxay isticmaali kartaa ilo kale oo laga helo macluumaad si ay u sameyso qiimeyn u gaar ah oo ku saabsan baahida loo qabo kaalmada maaliyadda. Macluumaadkaan wuxuu awood u siin doonaa GSEHC in ay go'aan xogogaal ah ka gaarto baahida maaliyadda ay qabaan bukaanka aan ka soo jawaabi karin iyadoo isticmaasha qiyaasta ugu fiican ee la heli karo bacdamaa aan la haynin macluumaad uu toos u soo gudbiyo bukaanka. Tijaabada hantida laguma dabaqi karo qoysaska dakhligooda sannadka ku beegan yahay ama yar yahay 200% FPG midka ugu dambeyay xagga goobaha loo adeego ee ka qeybgal Brograamka Ciidanka Adeegga Caafimaadka Qaranka (National Health Service Corps Program) (NHSC).

GSEHC waxay isticmaali doontaa dhinac saddaxaad in ay elataroonig ahaan fiiriso macluumaadka bukaanka, si ay u qiimeyso baahida maaliyadda. Fiirintaan waxay adeegsan doontaa modelka la aqoonsan yahay ee daryeelka caafimaadka ee ku dhisan xogta diiwaanka dadweynaha. Modelkaan saadaaliya waxaa ku jira xogta diiwaanka dadweynaha si loo xisaabo buundada awoodda bulsho-dhaqaale iyo maaliyad lagana helo qiyaasta dakhliga, hantida, iyo lacagta caddaanka. (Tijaabinta hantida laguma dabaqi karo qoysaska dakhligooda sannadka yahay ama ka hooseeyo 200% FPG iminka jira xagga adeegyada ka qeybgala NHSC).

Waxaa la adeegsan doonaa farsamada elataronigga, ka hor inta aan lagu tilmaamin deynta xun kaddib marka ay dhamadaan ilaha kale lacag bixinta ee la ogol yahay. Tani waxay u ogolataa GSEHC in ay bukaanka u kala saaraan kuwa u baahan kaalmada maaliyadda ka hor inta aan laga qaadin talaabo ka soo aruurin. Xogta laga helo fiirintaan xaq u yeelashada ee elataroonigga waxay ahaan doontaa mid ku filan warqadaha la xariira baahida maaliyadda ee hoos yimaada siyaasaddaan.

## ADEEGYADA CAAFIMAADKA DEGDEGGA

Sida waafaqsan sharciyada SHARCIGA DAWEYNTA CAAFIMAADKA IYO SHAQADA EE DEGDEGGA FEDERAALKA (FEDERAL EMERGENCY MEDICAL TREATMENT AND LABOR ACT (EMTALA), lama ogola in bukaanka la baaro si uu u helo kaalmada maaliyadda ama macluumaadka lacag bixinta ka hor inta aan la siinin adeegyada xaaladaha degdegga. Waxaa dhici karto in GSEHC codsato in lacag bixinta kharashka lala qeybsado bukaanka (macnaha, bukaanka qeyb ka bixiyo daweynta) la sameeyo waqtiga la fullinaayo adeegga, hase ahatee codsiyada noocaas waa in aysan sababin hakad ku yimaada baarista kala saarka caafimaadka ama dajinta daryeelka loo baahan yahay xagga xaaladda caafimaadka degdegga (Fiiri Siyaasadda GL-3001).

## XISABAADKA LAGU SOO DALLACO BUKAANKA XAQA U YEESHA KAALMADA MAALIYADDA

Xisaabta guud ahaan la soo dallaco waa lacag bixinta laga filaayo bukaanka, ama damaanad qaadaha bukaanka, ee xaqa u yeesha kaalmada maaliyadda. Bukaanka aan ceymis lahayn ee xaqa u yeesaha, xisaabtaan kama badnaan karto xisaab la ogaan doono marka la isticmaalo Habka Gadaal Fiirinta (Look Back Method).

Habka Fiirinta Gadaal (Look Back Method) waxay ku saleysnaan doontaa xisabaadka la ogol yahay sida hoos timaado Khidmadda-ku-Baxda Adeegyada ee Medicare (Medicare Fee-for-Services) iyo dhamaan ceymiyeyaasha caafimaadka gaarka ee bixiya sheegashooyinka GSEHC. Sheegashooyinka loo baahan yahay in lagu darro xisabaadka AGB waxay ahaan doonaan sheegashooyin la ogoladay sannadkii la soo dhaafay. Xisabaadka ceymiska leysla bixiyo (co-insurance), xisabaadka ceymiska la wada bixiyo (copayment) iyo xisabaadka uu horay u bixiyo bukaanka (deductibles) waxaa lagu darri doonaa xisaabta lagu qoro dhanka kore waxaana raaci doono khidmadda Medicare ee lagu bixiyo adeegga iyo dhamaan qaanta la ogol yahay lagana qaato ceymiyeyaasha gaarka ee bixiya qaanta. Kharashka guud ahaan la soo dallaco lana xariira qaanta la soo sheegay waxaa lagu darri doonaa xisaabta hoose. AGB waxaa la xisaabi doonaa sannad kasta. Boqolkiiba waxaa lagu dabaqi doonaa maalinta 120aad kaddib dhamaadka sannadka ay isticmaasho GSEHC si ay u xisaabto boqolkiiba AGB.

## DALABKA KAALMADA MAALIYADDA

Xaq u yeelashada kaalmada maaliyadda waxay ku saleysnaan doontaa baahida maaliyadda waqtiga arjiga. Guud ahaan, waxaa loo baahan yahay warqado si loo taageero arjiga kaalmada maaliyadda. Haddii aan toos loo siinin warqad, GSEHC waxay raadin doontaa macluumaad dheeraad ah. Waxaa loo baahan yahay caddeyn leysku haleyn karo si loo taageero baahida loo qabo kaalmada maaliyadda.

Bukaanka, ama damaanad qaadeyaashooda, waxaa looga baahan yahay warqadaha dakhliga soo socdo si loo ogaado xaq u yeelashada:

1. Koobiga canshuur celinta Federaalkla, iyo dhamaan Jadwalada (Schedules), laga soo qaaday canshuur celinta sannadkii ugu dambeyay
2. Caddeynta Dakhliga ee Iminka Jirta (koobiga dabada jeegga mushaarka ama warqado kale)
3. Caddeynta dakhli kale, kana mid ah shaqo la'aanta, magta la siiyo shaqaalaha, masaruufka cunugga, taakuleynta ay isa siiyaan labada isqabta, dakhliga ammaanada, manafacaadka ciidan hawlgabka
4. Bayaanada Bankiga Iminka Jira

Bukaanka iyo damaaanad qaadeyaasha waxaa laga rabaa warqadaha hantida ee soo socda, si loo ogaado xaq u yeelashada (Laguma dabaqi karo qoysaska dakhligooda sannadka ku beegan yahay ama ka yar yahay 200% FPG iminka jira xagga meelaha loo adeego ee ka qeybgala NHSC):

1. Xisabaadka wareega
2. Xisabaadka keydka
3. Xisabaadka lacagta suuqa (Money market accounts)
4. Shahadooyinka keydka
5. Lacagaha aruura sannadkii
6. Xisabaadka maalgelinta aan ahayn hawlgabnimada
7. Xisabaadka hawlgabnimada, kana mid ah xaqa
8. Hantida maguuraanka

9. Wax kale hantida

Arjiyada lagu dalbado kaalmada maaliyadda waxaa la soo gudbin karaa ilaa 240 maalin kaddib taariikhda ku qoran bayaanka kowaad ee ka dambeeyo ka-saaridda.  Haddii arjiga uusan dhamaystirneen, ama ay jirto codsi la rabo in lagu helo macluumaad dheeraad ah, arjiga wuxuu ahaan doonaa mid shaqeeyo muddo soddon (30) maalin laga bilaabo taariikhda warqadda loo diray arjiilaha soo codsaday macluumaadkaan. Haddii arjiilaha uusan ka soo jawaabin muddo soddon (30) maalin gudahooda, arjiga waa la soo diidi doonaa.

Muddada la fiiriyo Arjiga Kaalmada Maaliyadda (Financial Assistance Application) (FAA), waa la joojin doonaa dhamaan dacwadaha soo aruurinta. Waxaa FAA lagu qori doonaa diiwaanka bukaanka ama waxaa lagu samayn doonaa skan, kaddibna waxaa xasuus lagu qori doonaa xisaabta. Habka biilka caadiga waa in la sii wado inta FAA la fiiriyo lana tixgeliyo. Haddii wakiilka ku habboon ee GSEHC soo ogolaado FAA waafaqsan, tani waxaa lagu qori doonaa faylka bukaanka kaddibna waxaa lagu qori doonaa koodka ku habboon. Arjiyada kaalmada maaliyadda waa in loo gudbiyo xafiiska soo socdo:

Gundersen St. Elizabeth’s Hospital and Clinics
Attn: Financial Counselor
1200 Grant Boulevard West
Wabasha, MN 55981
651-565-5697

Haddii la soo diido kaalmada maaliyadda, bukaanka ama damaanad qaadaha buikaanka waxay dib u soo dalban karaan waqti kasta oo isbaddal ku yimaado xaaladda dakhliga.

## GO'AANADA XAQ U YEELASHADA, RACFAANADA IYO XALLINTA QILAAFKA

Bukaanka waa in qoraal lagu ogeysiiyo go'aanka FAA muddo soddon (30) maalin gudahooda laga bilaabo taariikhda la gudbiyo arji dhamaystiran. Bukaanka loo garto in uu 100% xaq u leeyahay kaalmada maaliyadda waxaa la soo celin doonaa lacagaha uu bixiyay ee ka badan xisaabta loo garto in uu bukaanka ama damaanad qaadaha ka qabo xisabaadka la siiyay kaalmada sida hoos timaado siyaasadda kaalmada maaliyadda GSEHC. Lacag celinta waxay quseysaa lacagaha la'eg $5.00 ama ka badan. Sida waafaqsan siyaasaddaan, guud ahaan, kaalmada maaliyadda kama mid aha lacagaha ceymiska ee la wada bixiyo ama baaqiga haray kaddib marka shirkadda ceymiska bixiso haddii bukaanka ku guuldareysto in uu helo tixraacyada ku habboon ama ogolaasho, ama haddii kaalmada noocaas aysan waafaqsaneen heshiiska lala galay ceymiska, sidaas darteedna, lacag bixinta noocaas ee la qabtay lama soo celin doono.

Bukaanka waxay racfaan ka qaadan karaan go'aankaan iyagoo soo qora muddo soddon (30) maalin gudahooda laga bilaabo marka ay helaan ogeysiiska, iyagoo u soo dira:

Siistemka Caafimaadka Gundersen (Gundersen Health System)
Ku Socoto: Maamulaha Adeegga Maaliyadda Macaamilka
1900 Koofur Avenue
La Crosse, WI  54601

Racfaanada waa in la soo gudbiyo muddo soddon (30) maalin gudahooda laga bilaabo taariikhda go'aanka asalka. Guddiga u xil saaran kana soo jeeda Wareegga Dakhliga (Revenue Cycle) ayaa fiirin doono racfaanka si loo siiyo tixgelin dheeraad ah. Go'aanada guddiga loo xil saaray waxay ahaan doonaan kama dambays.

## MUDDADA AQOONSIGA

Haddii arjiilaha loo garto in uu xaq u leeyahay kaalmo, GSEHC waxay siin doontaa kaalmada maaliyadda muddo lex (6) bil. Kaalmada maaliyadda waxaa kaloo laga soo bilaabi karaa dhamaan biilasha aan la bixinin ee la xariira xisaabaadka lagu bixiyay adeegyada la qaatay lex (6) bil ka hor taariikhda arjiga. Ma jiro bukaan loo diidi doono kaalmo, ku saleysan bixin la'aanta macluumaadka ama warqadaha aan looga baahneen arjiga.

## OGEYSIINTA KAALMADA MAALIYADDA

Macluumaadka ku qoran siyaasadda kaalmada maaliyadda GSEHC iyo tilmaamaha ku saabsan sida loola xariiro GSEHC si loo hel kaalmo iyo macluumaadka dheeraadka, iyo sidoo kale macluumaadka ku saabsan fursadaha lacag bixinta, waxaa la soo gelin doonaa goobaha diiwaan gelinta iyo soo-gelinta isbitaalka iyo kliinikada, iyo waaxda degdegga isbitaalka. Macluumaadkaan waxaa laga heli karaa la-talliyeyaasha maaliyadda ururka.

Siyaasadda kaalmada maaliyadda GSEHC, arjiga iyo soo koobidda luqadda fudud ee siyaasadda waxaa laga heli doonaa bogga internetka siistemka ama https://www.gundersenhealth.org/patients-visitors/financial-assistance. Macluumaadkaan waxaa kaloo lagu heli karaa lacag la'aan, marka lala xariiro Caafimaadka GSEHC (GSEHC Health), telefoonka (608) 775-8660 ama (800) 362-9567, khadka 58660.

Macluumaadka ku saabsan siyaasadda kaalmada maaliyadda GSEHC waxaa bukaanka lagu gaarsiin doonaa luqad ku haboon hiddaha. Macluumaadka ku saabsan kaalmada maaliyadda, iyo ogeysiisyada ku qoran goobaha isbitaalka iyo kliinikada waa la tarjumi doonaa, waxaana lagu soo qori doonaa luqadda aasaasiga ay ku hadlaan, hadba midkii yar, 1,000 ama 5%, dadka daggan goobta loo adeego.

Kaddib, GSEHC waxay ku soo dartay tixraacinta siyaasadaha lacag bixinta iyo kaalmada maaliyadda ee dhamaan bayaanada bukaanka iyo warqadaha soo aruurinta ay bil kasta soo saarto GSEHC. Waa la heli karaa macluumaadka ku saabsan siyaasadda kaalmada maaliyadda GSEHC, waqti kasta, kaddib marka bukaanka codsado.

## SHARUUDAHA XEERKA (REGULATORY REQUIRMENTS)

Siistemka Caafimaadka GSEHC waxau u hoggaansami doontaa dhamaan sharciyada, xeerka, iyo deegaanka, iyo sharuudaha warbixinta ee laga yaabo in lagu dabaqo hawlaha la fulliyo sida waafaqsan siyaasadda. Siyaasaddaan waxay u baahan tahay in GSEHC la socdaan kaalmada maaliyadda la bixiyo si loo hubsado warbixin sax ah. Macluumaadka ku saabsan kaalmada maaliyadda la bixiyay sida hoos timaado siyaasaddaan ayaa sannad kasta lagu soo gudbin doonaa Foomka IRS 990 Jadwalka H (IRS Form 990 Schedule H).

## DIIWAAN GELINTA

GSEHC waxay qoraal ka reebi doontaa dhamaan kaalmada maaliyadda si ay ugu fulliso kantaroolka ku habboon lana kullanto dhamaan sharuudaha u hoggaansamida gudaha iyo dibadda.

## ANSIXINTA SIYAASADDA

Siyaasadda kaalmada maaliyadda GSEHC waxaa la siiyay soona ogolaaday Guddiga iyo aamulka Maaliyadda GSEHC (GSEHC Finance Committee and Board) marka ay ahayd Febraayo 17, 2024.  Siyaasaddaan waa la fiirin doonaa muddo ka muddo. Isbaddal kasta oo la taaban karo laguna sameeyo siyaasadda waa in uu soo ogolaado Guddiga GSEHC (GSEHC Board).